

Leenka Cusub ee METRO H



Gaadiid kuwii hore ka dhaqsa badan ayaa ka soo shaqa galaya marinka Como Avenue iyo Maryland Avenue

Leenka METRO H waa leen bus rapid transit (BRT) kaas oo bixin doona gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo Como Avenue iyo Maryland Avenue. Basaska BRT iyo booteejooyinku waa kuwo raaxa leh oona sahlan in la isticmaalo.

Leenka METRO H wuxuu mari doona Washington Avenue, Pleasant Street, 15th, iyo Como avenues ee Minneapolis iyo Como, Maryland, iyo White Bear avenues ee St. Paul.


Waqtigan xaadirka ah, marinka H Line waxaa inta badan u adeega waddooyinka 3 iyo 80.

Metro Transit waxay qorsheyneysaa goobaha boosteejada Leenka METRO H



FAALLO KA BIXI UGU DAMBAYN ISNIIN, MEEY 4

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo metrotransit.org/h-line-project



Jadwalka Mashruuca Hordhaca (waa la bedeli karaa)



CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:
Alyssia Bell, Isuduwaha Wacyigelinta
HLine@metrotransit.org

metrotransit.org/h-line-project

Bus Rapid Transit (Nidaam Gaadiid Bas oo Mashquul badan): Gaadiid dhaqso badan, la isku halayn karo, oo raaxo badan

Metro Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibrada macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka



Boosteejooyinka xaafadaha oo leh adeegyo

Boosteejooyinka waxaa lagu qalabeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip macluumaadka waqti saxda ah ee gaadiidka imaanaya iyo marka uu baxayo
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah
- Goob kor u qaadan oo gaadiidka laga fuuli karo – ugu lugaa baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Meelaha la saarto Baaskiilka iyo weelka qashinka

Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah

BRT waxay shaqayn doontaa 10kii daqiiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qarshaha leenka kasta u sii socdo, Metro Transit waxay qiimayn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeega baska deegaanka oo lagu soo kordhiyo wadada.

Bixinta qiimaha safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdegga ah

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiisha ayaa iibsana doona tigidh ama waxay ku taaban doonaan Go-To Card mashiinta taala boosteejada, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka lacagta waxa samayn doona wakiilada TRIP.

Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaaraha

Marka lagu daro saldhigyada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeya. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socoto; basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoysyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaaliyo taraafikada